



Sawirka: gudaha guri cusub oo ku yaal Victoria Street Flemington

## Guryo bulsho oo cusub oo ku yaal Flemington



Maadaamo aan u jihaysanay dhankii howlgab looga dhigi lahaa saraha dhaadheer ee ku yaal xaafadaada, guryahan ku yaal Victoria Street, Flemington si qurux badan ayaa loo qaabeeyey, tamar hufan iyo meel ku habboon si aad u joogtayso xidhiidhka xaafadda iyo bulshada aad hada ku dhex jirto.

Guryahaan waxaa la filayaa in la dhammeeyo dabayaaqada 2023 waxayna dhawaan diyaar u noqon doonaan inaad kormeerto.



## Dhismaha Wadada Victoria Street

Guryahan cusub waxay nasiib u yeeshen inay helaan cinwaanka Victoria Street, oo u dhow dugsiyada, dukaamada wax laga iibsado ee Racecourse Road iyo cidhifka goobta dabaqyada dhaadheer ee Flemington.

Dib u cusboonaysiin dheeraad ah ayaa ku jira marxaladda qorsheynta ee goobtan oo ay ka mid yihiin guryo cusub oo badan iyo meelo bannaan.



## Guryaha Bulshada Victoria Lintied

Guryahaan waxaa maamuli doona Community Housing Victoria Limited kuwaas oo la yimid waayo-aragnimo weyn iyo waxqabad. Qofka kireystaha ah ee dhawaan laga rari doono saraha dhaadheer ee howlgabka laga dhigi doono **ma jiri doonto isbeddel ku imaanaya xuquuqdaada kirayste ahaan ama habaynta kiradaada.**



# Guryo cusub oo ku yaal Victoria Street, Flemington

Guryahan sida joogtada ah loo nashqadeeyey ee ay u dhameystiran yihiin korantadooda waxay noqon doonaan kuwo lagu raaxaysan karo sanadka oo dhan waana raqiis qaboojintooda iyo kululeyntooda. Dhammaantood waxay ku xidhnaan doonaan shabakadaha tamarta deegaanka ee ku xidhan oo siinaya dadka deggan qiimaha suuqa ugu wanaagsan iyo 100% tamarta dib loo cusboonaysiin karo.

Guryaha oo dhami waxay leeyihiin iftiin dabiici ah oo aad u wanaagsan iyo hawo-qaadasho, meelo wax lagu kaydiyo oo cabbirkoodu wanaagsan yahay iyo qalabyo casri ah oo ay weheliyaan balakoono ama barxaddo.

## ASTAAMAHA

Gurya **1, 2, 3** iyo **4** qol ka kooban



### SILVER

Naqshad guri lagu noolaan karo



**GAAS** looma icticmaalayo



**HOY** la heli karo



### 5 XIDDIG

Qiimaynta Xiddigta Cagaaran



### 7 XIDDIGOOD

NatHERS celcelis qiimeynta



## Ku socdaal

Toddobaadyada soo socda guryahan ayaa diyaar u noqon doona inaad kormeerto.

Waxaa lagugu martiqaadayaa inaad nagala soo qeyb gasho safar la hagayo si aad wax badan uga barato astaamohooda iyo inay yihiin kuwo ku haboon.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad qayb ka noqoto safarka eegista fadlan email [relocationsteam@homes.vic.gov.au](mailto:relocationsteam@homes.vic.gov.au) ama taleefan u dir **1800 716 866**.



Sawir qaadista hawada ee guryaha cusub ee Victoria Street, Flemington

## U guurista guri cusub

Waxaan diyaar u nahay inaan kaa caawino inaad hesho guri cusub oo buuxiya baahiyahaaga gaarka ah xaqiijinayana inaad ku xidhnaato xaafadda iyo bulshadaba.

Waxaa laga yaabaa inaad xiisaynayso mid ka mid ah guryahan ama aad rabto inaad qof kala hadasho habka dib u dejinta ama xulashooyinka kale.

limayl noogu soo dir **relocationsteam@homes.vic.gov.au** ama taleefan kasoo wac **1800 716 866** ama la xidhiidh xafiiska guryaynta deegaankaaga.

Waxaan kuu diyaarin doonaa waqti kugu habboon si aad uga hadasho baahiyahaaga, meelaha aad door bidayso, iyo habka codsiyada.

Xubnaha qoyska waa la soo dhaweynayaa inay kula yimaadaan sidoo kale waxaan diyaarin karnaa turjubaan ku caawiyo.



## Wax badan ka ogow

Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan dib u dhiska Victoria Street, Flemington fadlan booqo websaydkayaga oo ah



I iskaan garee (scan me)

[homes.vic.gov.au/victoria-street-flemington](https://homes.vic.gov.au/victoria-street-flemington)

Si aad isaga diiwaan geliso wixii ku soo kordha iyo dhacdooyinka goobta, iimayl u dir: **enquiries@homes.vic.gov.au**

La soco **@homesvic** bulshooyinka

